

Diiwaanka cusub ee cabbirka kaarka KOOFID-19

Sebtember 14, 2021

Dadka reer Alberta waxay dhowaan heli karaan caddayntooda tallaalka daabacaad cusub oo ku habboon cabbirka kaarka oo loo marayo Diiwaanka Caafimaadkeyga (MyHealth).

Laga bilaabo Sebtember 16, dadka reer Alberta waxay awoodi doonaan inay daabacaan nuqul kaarkooda cabbirka kaarka KOOFID-19 ee tallaalka ama ku muujin karaan taleefankooda ama taabletka.

Waxa kale oo socota hawsha si caddaynta tallaalka loo helo iyada oo loo marayo koodka QR. Koodka QR wuxuu noqon doonaa hab sahlan, dhaqso badan oo ammaan ah si loo wadaago diiwaanka tallaalka marka loo baahdo. Lambarka QR ayaa la filayaa inuu diyaar noqdo toddobaadyada soo socda.

Waxaa lagu talinayaa in dadka reer Alberta ay horay u qorsheeyaan oo ay ku kaydsadaan caddayntooda kaarka tallaalka taleefankooda ama ay daabacaan ka hor taariikhda loo baahan yahay. Diiwaanada Caafimaadkeyga (MyHealth Records) ayaa laga yaabaa inay la kulmaan mugg dhaqdhaqaaq badan leh ka hor dhacdooyinka waaweyn iyo maalmaha fasaxa dheer.


Dadka reer Alberta ee u baahan taageero waxay la xiriiri karaan khadka taageerada Diiwaanka Caafimaadkeyga (MyHealth Records) [support line](tel:1-844-401-4016) at 1-844-401-4016 laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 7 fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha, iyo dhamaadka todobaadka laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo Caddaynta Su'aalaha la isweydiiyo ([Proof of Vaccination FAQ](#)) ee alberta.ca waxay ka jawaabeysaa su'aalaha caadiga ah ee ku saabsan helitaanka diiwaanka tallaalka.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa masiibada KOOFID-19 iyada oo ilaalinaysa nolosha iyo habnololeedka tallaabooyin sax ah si loola dagaalamo, loona joogteeyo ganacsiyada yaryar loona ilaaliyo nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

Xaqiiqooyin degdeg ah

- Diiwaanada Caafimaadkeyga (MyHealth Records) waxaa laga heli karaa khadka tooska ah iyada oo loo marayo bogga khadka tooska ah ama loo marayo barnaamij lagu soo dejiyay taleefan ama taabletka.
- Dadka reer Alberta ee doonaya inay galaan Diiwaanka Caafimaadkeyga (MyHealth Records) waa inay marka hore haystaan Aqoonsiga Dijitalka ah ee ([MyAlberta Digital ID](#)). Koontada Aqoonsiga Dijitalka ee MyAlberta waxaa laga sameysan karaa (account.alberta.ca) iyadoo la isticmaalayo shatiga darawalnimada Alberta ama kaarka aqoonsiga.
- Dadka reer Alberta waa inay isticmaalaan lambarkooda daryeelka caafimaadka ee gaarka ah si ay uga sameystaan koonto ee Diiwaanka Caafimaadkeyga (MyHealth Records) ee alberta.ca/mhr.
- Diiwaanada tallaalka KOOFID-19 ayaa loo diyaariyey tan iyo Diseembar 2020 reer Alberta oo jira 14 iyo ka weyn.

- In ka badan 110,000 ee dadka reer Alberta ah ayaa sameeystay koontadooda Diiwaanka Caafimaadkeyga (MyHealth Records) saddexdii toddobaad ee la soo dhaafay, taasoo tirada guud ee dadka isticmaala ka dhigaysa ilaa 910,000.
- Dhammaan reer Alberta waa inay helaan warqada diiwaanka tallaalka marka la maamulayo tallaalkooda KOOFID-19.
- Ka sokow helitaanka caddeynta tallaalka ee khadka tooska, dadka reer Alberta ee raadinaya caddeynta tallaalka waxay:
 - La xiriiri karaan farmashiyaha aa xafiiska dhakhtarka meesha ay ka heleen tallaalka ama wac 811.
 - Ka mid tahay in la helo caddaynta tallaalka carruurta ka yar 14 sano oo aan ka heli karin diiwaanadooda caafimaadka (MyHealth Records).
 - Dadka reer Alberta waxay la xiriiri karaan khadka taageerada Diiwaanka Caafimaadkeyga (MyHealth) [support line](tel:1-844-401-4016) ee 1-844-401-4016 ama iimayl u dir myhealthrecords@gov.ab.ca.
 - Si lagaaga caawiyo Aqoonsiga Dijital ee Alberta, dadka reer Alberta waxay la xiriiri karaan khadka taageerada 1- 844-643-2789 ama iimayl myalbertaid@gov.ab.ca.



COVID-19 Immunization Record

First Name: Jane
 Last Name: Alberta
 Birthdate: March 15, 1990
 Gender: Female

The information in this report is provided as of September 07, 2021 06:29 PM.

Date Administered	Vaccine Name	Description	Source
July 15, 2021	COVID-19 BNT162b2 - mRNA	Pfizer/BioNTech	Government of Alberta - Provincial Immunization Repository
May 01, 2021	COVID-19 BNT162b2 - mRNA	Pfizer/BioNTech	Government of Alberta - Provincial Immunization Repository


MyHealth Records is a service from Alberta Health

All information contained in this report is privileged and confidential information intended for use by authorized individuals only.

Page 1 of 1

Caddeyn cusub ee kaarka daabacan ee tallaalka.

MHR Adoption



Kobaca isticmaaleyaasha Diiwaanka Caafimaadkeyga (MyHealth).

Xogta la xiriirta

- Tallaalada KOOFID-19 iyo diiwaanada ([COVID-19 vaccines and records](#))
- Caddaynta tallaalka la isweydiyo ([Proof of vaccination FAQ](#))
- Helitaanka diiwaankaaga tallaalka KOOFID-19: waraaqda xogta Diiwaanka Caafimaadkeyga MyHealth Records ([Getting your COVID-19 immunization record: MyHealth Records information sheet](#)) (PDF)
- Diiwaanada Caafimaadkeyga ([MyHealth Records](#))

Warbaahinta kala duwan

- Liiska fiidiyowyada ([Video playlist](#))
- Boor ([Poster](#)) (PDF)

Weydiimaha warbaahinta

[Steve Buick](#)

780-288-1735

Xoghayaha Sare ee Saxaafadda, Caafimaadka

Si aad u hesho ilo badan oo dawladdu turjuntay, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.